



## EcoChallenge oo ardayda siisay hab ay u bilaabaan Maalinta Dhulka

Maalinta Dhulku waa Axada, Abriil 22. Maxaad samayn kartaa si aad tallaabo u qaado? Waa hagaag, waxay dhammaan ku bilaabmaan caadooyinkaaga. Waxay dhahaan waxay ku qaadataa qiyaastii laba toddoaad in lagu bedelo caado, sidaa darteed fiirinta waxa aanu sameyno hadba xaalada la joogo maalintaasi, waxaan ka heli karnaa siyaabo badan oo kala duwan si ay u noqdaan kuwo joogto oo aan dadaal badan u baahnayn. Tusaale ahaan, haddii aad ka tegto biyaha, marka aad rumayaneyso/cadayanayso, isku day in aad xirto. Marka aad tani sameyso, waxaad badbaadinaysaa 5 gallons oo biyo ah.

Sanad kasta, Machadka Dhulka ee Northwest, oo ah urur aan faa'iido doon ahayn oo deegaanka ah oo xaruntiisu tahay Portland, ayaa qabta EcoChallenge si loogu dhiirigeliyo dadka in ay yareeyaan saameynta ay ku leeyihiin deegaanka iyaga oo bedelaya caadooyinka.

Dadka in ka badan 40 wadan oo sanad kasta ka qayb qaata – ayaa ka hadla saameyn uu caalamka ku leeyahay! Waxaa jira qaybo kala duwan oo la kala dooranyo, oo ay ku jiraan qashinka, cuntada, gaadiidka, bulshada, iyo badan oo kale oo dheeraad ah. Marka aad xulato qayb, waxaad dooranaysaa loolan aad galayso.

Loolanadu way kala duwan yihiin iyaga oo ku bilaabmaya kuwo fudud ilaa laga gaarayo kuwo adag, hadba loolanku markuu sii adkaadaba, waxaa badanaya dhibcaha dheeraadka ah ee aad hesho. EcoChallenge wuxuu sidoo kale la socon doonaan saameynta haddii aad dhacdo in aad badbaadisay khayraad. Ilaa iyo hadda, ka qayb qaatayaashu waxay 5,000 oo ah dhalooyinka caaga ka badbaadiyeen in ay aadaan goobta qashin qubka iyo ku dhawaad 90,000 gallons oo biyo ah. EcoChallenge waxay soconaysaa ilaa Juun 30, sidaa darteed xaqiiji in aad si dhaqso ah iskugu diiwaangeliso!

Halkan waxaa ku qoran sida la iskugu diiwaangelinayo:

- Booqo [Website-ka Dhismaha EcoChallenge](#)
- Waxaad riixdaa halka ay ku qoran tahay “JOIN”
- Lambarka/xarafka sitar ah ‘password’ si loogu soo biro waa **campus1718**
- Samee magac lagu gelayo ‘user name’ iyo lambarka/xarafka sirta ah ‘password’
- Samee ama ku biir koox – waxaa xataa laga yaabaa in aad hesho koox aad garanayso qof ku jira!
- Dooro tallaabooyinkaaga
- Soo sheeg tallaabooyinkaaga marka la gaaro dhammaadka maalinta isla markaana fiiri dhibcahaaga la isku keenay!

**Sida ay ku bilaabantay Maalinta Dhulku**

Ka dib markii uu arkay Saliid ku Daadatay Santa Barbara 1969-kii oo dishay kumanaan ka tirsan xayawaanka badda, Senator Gaylord Nelson ka socday Wisconsin wuxuu ogaa in la joogay waqtigii tallaabada la qaadayay. Iyada oo ay dhiirigelisay mudaharaadyadii lagaga soo horjeeday dagaalka ee ay soo abaabuleen ardaydu, Nelson wuxuu qaaday hab kaasi la mid isaga oo abaabulay dood arrimaha deegaanka bannaanka loogu soo saarayo. Wuxuu ahaa mid nidaamsan marka ay noqoto shaqaaleysiinta shaqaalihisa iyo abaabulka dhacdada, isaga oo ka bilaabay Pete McCloskey, oo ahaa qof maskaxdiisu u furan tahay ilaalinta deegaanka ahaana congress ka tirsan xisbiga Republican-ka, iyo Denis Hayes, oo ahaa arday dhigta Jaamacadda Harvard.

Inka badan 20 malyuun oo Maraykan ah oo ka socda dhammaan dhinacyada kala duwan ee dhanka siyaasadda ayaa isku soo baxay Abriil 22, 1970, iyaga oo sitay astaamo iyo calaamado dhammaan magaalooyinkooda. Waxay heleen waxyaabo ay iska mid yihiin iyo qiime uu midba midka kale la wadaagayo iyaga oo si wadajir ah socod u maray si ay ula dagaalamaan daadinta saliida, wakahseynta hawada, suntan cayayaanka iyo iyo waxyaabo kale oo badan. Dadaaladani ayaa horseeday abuuritaanka Hay'adda Illaalinta Deegaanka iyo aasaaska Biyo Nadiif ah, Hawo Nadiif ah, iyo Xeerka Noolaha Dabar Go'aya 'Endangered Species Acts' kaasi oo la abuuray dabayaaqadii sanadkaasi.

Laga soo bilaabo maalintaas 1970-kii, Maalinta Dhulku waxay noqotay fasaxa ugu ballaaran caalamka ee dadka aan diinta ku dhaganayn, kaasi oo ay u dabaaldegaan dhammaan kuwa doonaya in ay daryeelaan isla markaana ilaaliyaan dhulka. Marka aynu aragno isbedelka dhanka deegaanka ee nagu wareegsan, waa lagama maarmaan in wax ka badan sidii hore la sameeyo wax kasta oo ay qaadato si loo abuurto jawi nadiif ah, oo caafimaad leh oo loogu talagalay dhammaan dadka.

*-Sami Springs, Isku duwaha Mashruuca Deegaanka ee AmeriCorps*